

A Message from

The Professional Development Team



Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

Dhawaqa Sanadka Susub!

Wargeyskan saddexdii biloodba mar ka soo baxa Department of Children, Youth, and Families (DCYF) Gobolka Washington waxaa loogu talagalay in lagu ogeysiyo kuwa la shaqeeya carruurta, dhalinyarada, iyo qoysaska Washington dhammaan shaqada weyn ee ku jirta [Horumarinta Xirfaadeed](#).



Gudaha Wargeyskaan ...

- [PACE Ayaa Hadda la Heli Karaa!](#)
- [Maalgelinta Waxbarashada Hore – Results WA](#)
- [Kheyraadka loo Heli karo Haldoorka Shaqaalaha Xannaanada Ilmaha ee Ku Salaysan Dabeeecadda Bannaanka](#)
- [Cusboonaysiinta lagu sameeyay Hanuuninta Shatiyeenta Isbaanishka iyo Soomaaliga ee Goobta Tababarka DCYF](#)
- [Cusboonaysiinta Qaybah ELO \(Barashada Shucuurta Bulshada iyo Goobaha Dhallinyaradu kaxeeyaan\) ee Goobta Tababarka DCYF](#)
- [Isku diwaangeli koorsooyinka adigoo isticmaalaya badhanka Kooxda Cusub ee Goobta Tababarka ee DCYF](#)
- [Tababarka CCB ee Ku meel gaarka COVID-19 Ma ahan mid la heli karo](#)
- [Cusboonaysiinta Luuqadaha badan/Labada Luqadood](#)
- [Dadaallada Ka-qaybgalka PDs: La Soco!](#)
- [Taxanaha Kulanka Qadka Tooska Jiilaalka](#)
- [Raadinta Kulanka Qadka Tooska?](#)
- [Deeqaha libka Farm to School iyo Barashada Hore](#)

- [Kaalmada Farsamo ee Loo Heli karo Deeqda Xasilinta Xannaanada Ilmaha](#)
 - [Tababarayaasha iyo Barnaamijka Tababarka ee Gobolku uu Ansaxiyay](#)
 - [Taageerida Shaqaalaha ECE iyadoo loo marayo Waxbarasho](#)
 - [Hagaha Barnaamijka Waxbarasho ee DCYF](#)
 - [Deeqda waxbarasho ee Early Achievers: Sheekooinka Guusha](#)
 - [Ka-qaybgalka Bulshada ee DCYF](#)
 - [Warbixiinada Qabaa'ilka](#)
 - [Fariimo ka yimid Xoghayaha DCYF](#)
-

PACE Ayaa Hadda la Heli Karaa!

DCYF waxay qabatay kulanka qadka tooska markay ahayd Diseembar iyada oo ay la socoto warbixiinada ku saabsan tababbarka ay ansixisay DCYF ee u dhigma bixiyayaasha waxbarashada hore - hadda loo yaqaano PACE - Bixiyaha Ha heli karo Bulshada U dhiganta. Haddii aadan awoodin inaad nagu soo biiro si toos ah, waxaad daawan kartaa [daawo duubista](#). [Halkan riix](#) si aad wax badan uga ogaato waxa ku jira PACE.


DCYF waxay la shaqaynaysaa SBCTC si ay u abuurto hab lagu helo buundada kuleejka ee wadadaan tababarka. Wax badan oo ku saabsan shaqadan ayaa la heli doonaa bilaha soo socda.

Sideen ku bilaabi karaa PACE?

Bixiyayaasha waxbarashada hore waxay dhamaystiri karaan Aasaaska Xannaanada Ilmaha (CCB) iyo Korbinta tayada Waxbarashada Hore (EQEL). Si aad u hesho tababbarka la heli karo, isticmaal "[Hel Tababar](#)" taabo MERIT.

Tababaro dheeraad ah oo EQEL ah ayaa la heli doonaa [Goobta Tababarka ee DCYF](#) horaantii 2022. Qaybaha tababarka ee PACE cusub ayaa la heli doonaa Febraayo 2022.

Booqo [website](#)si loo sii wado doorashadan u dhiganta ee bixiyayaasha waxbarashada hore ee la shatiyeeyay ee u baahanaysa shahaado hore ama gaaban ee doorkooda. Wixii su'aalo ah, la xiriir [Diana Stokes](#).



Maalgelinta Waxbarashada Hore – Results WA

Oktoobar 2020 kii, DCYF waxa ay kala qayb qaadatay Dib u eegista Waxqabadka Dadweynaha Gudomiye Inslee si uu ula wadaago wax badan oo ku saabsan shaqada ka socota Waxbarashada Hore iyada oo loo eegayo hindisihiisa [Results WA](#). [Daawo duubabka](#).



Maxay tani ka dhigan tahay?

2022 da, DCYF waxa ka go'an in ay balaariso helitaanka tababbarka daryeelka dhaawaca-la wargeliyay iyadoo loo marayo EQEL. DCYF waxay la shaqaynaysaa iskaashatada tababarka si ay u kordhiyaan gaarsiinta Washington oo dhan. Si aad u hesho tababbarka la heli karo, isticmaal "[Hel Tababar](#)" taabo MERIT.

Intaa waxaa dheer, tababbarka bulshada ku salaysan, PACE, qayb ka mid ah shaqada taas oo ka dhacaysa shaqada [Results WA](#). DCYF waxay sii wadi doontaa inay ballaariso helitaanka sanadka oo dhan kuwa u baahan shahaado bilow ama gaaban doorkooda waxbarashada hore.

Sideen uga qayb qaadan karaa?

DCYF waxay qaban doontaa kooxaha diirada si ay u raadiyaan jawaab celin sanadka oo dhan. La soco si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan fursadahan xagga isgaarsiinta ee ay soo dirto DCYF ama booqasho [bogga shabakadda ee Dedaallada ka-qaybgalka PD](#).

Kheyraadka loo Heli karo Haldoorka Shaqaalaha Xannaanada Ilmaha ee Ku Salaysan Dabeeecadda Bannaanka

[Dabeeecada Ku Salaysan Bannaanka \(ONB\) Heerarka Taabashada](#)

Daryeelka Ilmaha ayaa hadda diyaar ah. Heerarkan waxaa ka mid ah haldoorka shaqaalaha ee ay tahay in lagu buuxiyo barnaamijyadan. DCYF hadda waxay leedahay kheyraad dhowr ah oo laga heli karo [haldoorka Shaqaalaha cusub ee bixiyayaasha ONB](#). Shabakadan, waxaad ka heli doontaa kheyraadka sida:

- [Shaxda Haldoorka Shaqaalaha Guud](#)
- [Shaxda Shuruudaha Tababarka iyo Jadwalka Dhamaystirka](#)
- Iyo in ka badan!



Baro wax badan!

Ma doonaysaa in aad wax badan kaogaato haldoorka shaqaalaha ee barnaamijyada ku Salaysan Dabeeecada Bannaanka? Ku biir Kulanka Qadka Tooska ee Febraayo: Barnaamijyada ku Salaysan Dabeeecada Dibadda, Kartida iyo Haldoorka, dhacaya Talaadada, Feb. 15 saacadu markay tahay 6 galabnimo. [Halkan iska diwaangeli](#).

Noqo barnaamijka ONB ee shatiga haysta

Haddii aad xiisaynayo inaad noqoto barnaamijka daryeelka ilmaha ee ku salaysan dabeeecadda bannaanka ee shatiga haysta, fadlan la xiriir dcyf.welcome@dcyf.wa.gov.

Cusboonaysiinta lagu sameeyay Hanuuninta Shatiyeynta Isbaanishka iyo Soomaaliga ee Goobta Tababarka DCYF

Waxaan cusbooneysiineynaa noocyada Isbaanishka iyo Soomaaliga ee Hanuuninta Shatiga Waxbarashada Hore ee Qaybaha 1 iyo 2 ee [Goobta Tababarka ee DCYF](#).

Si loo cusboonaysiyo Qaybaha, waxaan u baahan doonaa inaan ka qaadno khadka tooska ah si aan u galno tababarka la cusboonaysiyyay.

Tani waxaa loo qorsheeyay inay dhacdo Feb. 16. Kadib bilawga tababarka ee la cusboonaysiyyay, [ma awoodi doontid](#) inaad dib u bilawdo meeshii aad ka tagtay. Noocyada la cusboonaysiyyay waxay diyaar noqon doonaan Febraayo 18.



Cusboonaysiintaan waxaa ka mid ah:

- Qaybaha gaaban si loo yareeyo cilladaha farsamada

- Waxay u ogolaanaysaa shakhsiyadka inay ku noqdaan boggaga tixraaca
- Awoodda inaad si dhakhso leh ugu horumariso sawirada

Haddii aad su'aalo qabto, fadlan iimayl u dir training@dcyf.wa.gov.

Cusboonaysiinta Qaybaha ELO (Barashada Shucuurta Bulshada iyo Goobaha Dhallinyaradu kaxeeyaan) ee Goobta Tababarka DCYF

Waxaan cusboonaysiineynaa Fursadaha Waxbarasho ee La Balaariyay (ELO) Barashada Dareenka Bulshada (SEL) iyo qeybaha Goobaha Dhallinyarada (YDS) ee ku jira Goobta Tababarka ee DCYF si aan ugu fududeyno shakhsiyadka inay galaan gudiyada doodaha oo ay helaan saacadaha adeegga gudaha (STARS).

Inta lagu jiro cusboonaysiinta, koorsada lama heli doono. Haddii aad hadda dhammaynayo koorsada, **waxaad u baahan doontaa inaad sidaa samayso Febraayo 15, 2022.** Waxaan qorsheyneynaa inaan helno koorsooyinka ELO SEL & YDS ee la cusboonaysiyyay mar labaad bartamaha gu'ga.



Isku diwaangeli koorsooyinka adigoo isticmaalaya badhanka Kooxda Cusub ee Goobta Tababarka ee DCYF

Toddobaadyada soo socda, ardaydu waxay awood u yeelan doonaan inay si toos ah isugu diiwaan geliyaan kooxaha tababarka khadka tooska ah ee lagu tiriyo shuruudaha hore iyo kuwa gudaha ee si toos ah goobta tababarka DCYF iyada oo loo marayo taabka 'Kooxaha'. Kuwani waa tababaro wata guddiyo- doodeed oo buuxiyay shuruudaha tababbarka ee soo socda:

- CCB
- Sannadka EQEL

Soo gal akoonkaaga Goobta Tababarka ee DCYF www.dcyftraining.com oo ku dhufo **Kooxahataabo** bidixda. Hoos u deg oo kooxuhu waxay ka muuqan doonaan dhinaca bidixda. Waxaad dooran kartaa kooxda oo iska diiwaan gelin kartaa tababarka aad rabto inaad dhammaystirto (sawir ka muuqda hoos):

CATALOG

Courses **Cohorts**

Search...

Role	Language
<input type="checkbox"/> ECEAP Licensed	<input type="checkbox"/> English
<input type="checkbox"/> ECEAP Only	<input type="checkbox"/> Spanish
<input type="checkbox"/> ESIT Agency Admin	<input type="checkbox"/> Somali
<input type="checkbox"/> ESIT Intake and Referral	
<input type="checkbox"/> ESIT Service	

Topic
<input checked="" type="checkbox"/> Administrative (for FFN, Licensed, ECEAP)
<input checked="" type="checkbox"/> COVID-19 Temporary Health and Safety Training
<input type="checkbox"/> ECEAP
<input checked="" type="checkbox"/> ELO (School-Age) Social Emotional Learning
<input checked="" type="checkbox"/> ELO (School-Age) Youth Driven Spaces
<input checked="" type="checkbox"/> FOFI Year 1

Child Care Basics - Eastern Region

FOFI YR 1 - NW Region

Tababarka CCB ee Ku meel gaarka COVID-19 Ma ahan mid la heli karo

CCB waa tababarka bilowga ah si loo buuxyo shuruudaha caafimaadka iyo badbaadada ee barayaasha ka shaqeeya xarumaha waxbarashada hore ee shatiga haysta.

Nooca COVID-19 CCB ee ku meel gaarka ah, ee isku urursan hadda **lama heli karo**. Kuwa doortay dookhaan, waxaad u baahan doontaa inaad buuxiso nooca CCB oo buuxa inta lagu jiro sanadka kalandarka 2022 (Janaayo 1 - Dis. 31, 2022).



Waxaa jira habab kala duwan oo lagu buuxin karo shuruudaha tababarka CCB. Hoos ka eeg iyaga.

[CCB dhameystiran](#)

Cusboonaysiinta Luuqadaha badan/Labada Luqadood



- **Tababarka Labada Luqadood:**
 - Tababarkan ayaa laga heli karaa gobolka oo dhan isagoo ku baxaya Ingiriis iyo Isbaanish.
 - Waxaa lagu heli karo koox onlayn ah oo isku dhafan ama fududayn toos ah, oo hadda lagu hayo qaab macmal ah.

- 12 Saacadaha Adeegga (STARS) ayaa diyaar u ah kuwa dhammaystira dhammaan taxanaha tababarka.
- **Magacaabidda Labada Luuqadood:**
 - Xeerka Bilawga Cadaalada ah ee Carruurta, qaybta 305, wuxuu ugu baaqayaa DCYF inay dhistro magacyo laba luqadood ah si ay u bixiso kabit ama deeqo ECEAP, Early ECEAP, iyo bixiyayaasha shatiyeysan ama shahaadiga haysta kuwaa oo aqbala kaalmada gobolka.
 - DCYF waxay la shaqaynaysaa koox la-talin dhaqan ahaan, luqad ahaan, iyo gobol ahaanba si ay u horumariyaan magacaabida labada-luuqadood ah.
 - Kooxda la-talinta dibadda ayaa isku duba ridi doonta bixiyayaasha iyo xog uruurinta bulshada si ay u raadiyaan jawaab celin ku saabsan magacaabida labada luuqadood.
 - Xog uruurinta waxa loo diri doonaa bixiyayaasha, xarumaha, tababarayaasha, iyo qoysaska horraanta gu'ga (Febraayo ama Maars). Waxaan jeelaan lahayn jawaab celintaada! Xog uruurinta waxa kale oo la soo dhejin doonaa [PD Home bogga-ka](#) markay tahay febraayo ama Maars. Fadlan ka fiirsoXog uruurinta.

Su'aalo ama faallooyin ku saabsan labada luuqadood? La xiriir [Athena Jimenez-Manalo](#).

Dadaallada Ka-qaybgalka PDs: La Soco!

Kooxda PD waxaa ka go'an inay dadweynaha iyo daneeyayaashu ka qaybgalaan oo ay gacan ka geystaan shaqadeena.

Intii lagu jiray kulanka qadka tooska Janaayo, ee la qabtay Jan. 18, kooxda PD waxay soo bandhigeen bogga PD ee ugu cusub [Dadaalada Hawlgelinta PD](#) oo uu siiyey xog ku saabsan sida looga qayb-qaadan karo goobaha shaqada ee kala duwan ee kooxda, iyo sidoo kale ka-qaybgalka kooxaha la-talinta ee hay'adda oo dhan ama guddiyada ay kormeeraan. [Kooxda Ka Qaybgelinta Bulshada ee DCYF](#).



Waqtigan xaadirka ah, kooxdeena waxay haysataa fursado badan oo ay la socon karaan agagaarka:

- PACE (Galitaanka Bixiyaha ee Bulshada U dhiganta)
- Luuqadaha badan/Labada-Luqadood ee Barashada Hore
- Barnamijka Tababarka ee Gobolku uu Ansaxiyay

Waxaan jeelaan lahayn inaan maqalno codkaaga!

[Wax badan Baro oo ka Qayb Gal](#)

Fadlan ogow waxaan ka shaqeyneynaa inaan dib u duubno Kulanka qadka tooska Jannaayo waxaana lagu dhejin doonaa [bogga Wargeysyadaya iyo kulamada qadka tooska](#).

Taxanaha Kulanka Qadka Tooska Jiilaalka

Inta lagu jiro taxanahan, waxaan ka wada hadli doonaa mowduucyo ku saabsan dadaalladeena ka-qeybgalka, Barnaamijyada ku saleysan Dabeeecadda ee Bannaanka, baahiyaha tababbarka, iyo jawaab celinta. Hubi inaad isdiiwaangeliso oo aad ku biirto!



Febraayo: Barnaamijyada Ku saleysan Dabeeecadda Bannaanka | Kartida iyo Haldoornimada

Ma xiisaynaysaa inaad haysato ama aad ka shaqeyso barnaamijka daryeelka ilmaha ee ku salaysan dabeeecada dibadda?

Inta lagu jiro kulankan qadka tooska, kooxda PD waxay bixin doontaa dulmar ku saabsan kartida iyo haldoorka shaqaalaha ee Barnaamijyada ku salaysan Dabeeecadda Bannaanka. Wuxaan si faahfaahsan uga hadli doonaa mowduucyada soo socda:

- Haldoorka u qalmida shaqaalaha ee Barnaamijyada ku salaysan Dabeeecadda Bannaanka, iyo sida ay u barbar dhigto waxbarashada hore iyo barnaamijyada da'da dugsiga.
- Baro talaabooyinka xiga ee buuxinta shuruudaha waxbarashada shatiyeynta.
- Faham sida loo buuxiyo shuruudaha waxbarashada iyo tillaaboooyinka aad ku dhammaystiri karto inta lagu jiro waqtiga kaalintaada.



Talaado, Febraayo 15 | 6 galabnimo.

[Halkan iska diiwaan geli](#)

March: Professional Development Provider Needs (English, Spanish, Somali)

Inta lagu guda jiro golahan tooska ah iyo is-dhexgalka, waxaanu u kala qaybin doonaa qolal ku baxaaya Ingiriis, Isbaanish, iyo Soomaali si aan u maqalno jawaab-celintaada ku saabsan tababarka iyo horumarinta xirfadda.

- Sideed door bidaysaa inaad ku qaadato tababarka iyo goorma?
- Mowduucyadee tababar ee aad jeceshahay in lagu bixiyo?
- Maxaa kaa dhigaya inaad doorato tababarka aad dhamaysay?



Waxaanu rabnaa inaan maqalno dhammaan! Kooxda PD waxay yeelan doonaan su'aalo la hagayo iyo codbixin - fadlan nagu soo biir oo asxaabtaadana ha ku soo biiraan. Waxaan rabnaa inaan wax ka barano si aad tababarka uga dhigto mid macno badan leh.

Talaado, Maarso 15 | 6 galabnimo

Halkan iska diiwaan geli

Raadinta Kulanka Qadka Tooska?

Kulamada Qadka Tooska waa la duubaa oo si toos ah ayay noogu socdaan [bogga Wargeesyada iyo Kulamada Qadka Tooska](#).

Haddii aadan heli karin kulanka qadka tooska aad raadineyo, waxay u badan tahay inaan ka shaqeyneyno duubista iyo soo dejinta. Waanu kaaga mahad celinaynaa dulqaadkaaga. Haddii aad hayso su'aalo ku saabsan kulanka qadka tooska gaar ah, iimayl u dir [Marlene White](#).



Deeqaha libka Farm to School iyo Barashada Hore

[Waaxda Beeraha Gobolka Washington ee Farm to School](#) waxay ku faraxsan tahay inay siiso Deeq Wax- libka Farm to School cusub oo ay heli karaan dugsiyada, xarumaha daryeelka carruurta, iyo hawl-wadeennada barnaamijka cuntada xagaaga iibka iyo isticmaalka cuntooyinka Washington-kortay ee barnaamijyada nafaqeynta Ilmaha.

Deeqaha libka Farm to School iyo Barashada Hore waxa la bixin doonaa laba jeer. Deeqaha sanadka 1 hadda hawada ayey ku jiraan iyo **Arjiyada deeqda sanadka 2 waxaa loo qorsheeyay inay furmaan dabayaaqada gu'gan**.



Si aad wax badan uga barato barnaamijka deeqda oo aad u aragto liiska deeq-bixiyeyaasha hadda, booqo:

Deeqaha Farm to School

Kaalmada Farsamo ee Loo Heli karo Deeqda Xasilinta Xannaanada Ilmaha

Kaalmada Farsamada (TA) waxay halkan u joogtaa inay ka caawiso bixiyayaasha inay codsadaan deeqda xasilinta Xannaanada Ilmaha, fahmaan sida maalgelinta loo isticmaali karo iyo sida diiwaanada loo ilaalinayo. TA waxay bixisaa:

- Taageero waji ka waji ah ama waxbarasho koox yar
- Caawinta qof ahaan, taleefoon, ama mid fogaan arag ah (tusaale, Zoom).
- Ku taageer luqadda aasaasiga ah ee bixiyaha
- Taageerada tignoolajiyada, oo ay ku jirto gelitaanka iyo dhex gelida WA Compass Bixiyaha Diirada



Iska diiwaan geli!

The Imagine Institute iyo Voices of Tomorrow ayaa siin doona bixiyeyaasha TA.

The Imagine Institute

Shabakada: imaginewa.org/CCSG-Support

Telefoonka: (206) 492-5249

limayl: CSSG@imaginewa.org

Voices of Tomorrow

Shabakada: voicesoftomorrow.net

Telefoonka: (206) 278-8290

limayl: childcaresupport@tomorrowvoices.org

Tababarayaasha iyo Barnaamijka Tababarka ee Gobolku uu Ansaxiyay

Ma waxaad tahay tababare ama ma waxaad xiisaynaysaa inaad wax badan ka ogaato barnaamijka Tababarka la ansixiyay ee Gobolka-Washinton? Wargeyska Kocinta Shaqaallaha ee u dambeeyay waxa uu ku wajahan yahay Tababarayaasha Gobolka La Ansaxiyay.

Liis dhamaystiran oo ah Koritaanka Wargeyska Shaqada waxaa laga heli karaa bogga Wargeesyada DCYF iyo Kulamada Qadka Tooska:

[Wargeesyada iyo Kulamada Qadka Tooska](#)



Taageerida Shaqaalaha ECE iyadoo loo marayo Waxbarasho



DCYF way taqaanaa qiimaha waxbarashada waxayna u shaqeysaa si dadaal ah si ay ula shuraakoobaan bulshada tacliinta sare si ay u qaabeeyaan oo ay u bixiyaan barnaamijyo waxbarasho oo kala duwan iyo deeqo waxbarasho si ay u taageeraan shaqada waxbarashada hore. Si aad ula socoto wararka ku saabsan barnaamijyadan iyo kheyraadyada kale ee waxbarashada, booqo:

[Deeqaha waxbarasho, Dhiirigelino, iyo Abaalmarino](#)

Hagaha Barnaamijka Waxbarasho ee DCYF

Ma qabtaa su'aalo ama ma u baahan tahay caddayn ku saabsan barnaamijyada deeqda waxbarasho ee DCYF?

Tilmaamaha Barnaamijka Waxbarasho ee DCYF ee Deeqaha Early Achievers iyo Child Care Aware ee deeqaha waxbarasho of Washington ayaa laga heli karaa onlayn: [Tilmaamaha Barnaamijka Waxbarasho ee DCYF](#).

Ma rabtaa inaad wax badan ka barato deeqaha waxbarasho? Fiiri ikhtiyaarrada kuu bannaan: [Deeqaha Waxbarashada Hore](#).



Deeqda waxbarasho ee Early Achievers: Sheekoooyinka Guusha

Sheekada Anna

Aadayaan ugu mahadcelinaya deeqda Guuleystayaasha Hore. La'aanteeda, waxaa laga yaabaa inaan awoodin inaan dhaqaale ahaan qaato Qaybahan Waaan rabay in aan u shaqeyyo macalinimo ilaa markii aan yaraa, marka waan ka mahadcelinaya fursadan. Fasaladani aad bay ii caawiyeen fasalkayga. Qorshe hawleed kasta oo aan sameeyo waxaan ku sameeyaa fasalkayga waxaan ka arkaa isbeddelka horumarka carruurta. Waxaan wax badan ka bartay sababta horumarka tayada leh uu muhiim ugu yahay carruurta. -Anna D.

Sheekada Yara

Wan ku salamay, magacaygu waa Yara R. Waaan ka imid Gayaquil, Ecuador, waxaana ku noolaa Washington 15 kii sano ee la soo dhaafay. Waaan ahay hooyo leh afar carruur ah. Waaan ka shaqeyyay oo si mutadawacnimo ah uga shaqeyyay goobta waxbaridda anigoo korinayay carruurtayda. Aniga oo wajahaya furin watana afar carruur, waxbarasho la'aan, iyo shaqo la'aan, waxaan si adag u dareemay inaan u baahanahay inaan dib ugu laabto waqtii aan ku maalgeliyo xirfadeyda. Had iyo jeer waan jeclaa inaan wax baro, waana mid ka mid ah rabitaankayga.



Aadida Care.com hal maalin, waxaan ka bartay wax ku saabsan LWTech. Waaan wax ka bartay barnaamijkooda ECE oo wuxuu ahaa mid aad u xiiso badan. Maan hubin sida aan u heli doono, laakiin waxaan aad ugu baahnaa inaan ku laabto dugsiga oo aan shaqo holo. Dugsiga Faith Lutheran ayaa shaqaaleysiinayey oo markii aan waraystay oo aan helay shaqada, waxaan bartay inay yihiin dugsi shatiyeysan oo ay la shaqeyyaan barnaamijka Guuleystayaasha Hore.

LWTech waxay ahayd mid naxriis leh sida Dugsiga Faith Lutheran oo kale. Waaan kuso koray xirfadlenimo ahaan waxaan u yeelanayaa laf dhabarta waxa ay ku saabsan tahay waxbarashada hore ee carruurnimada. Farsamooyinka, horumarka carruurta, iyo sida loo gaaro yoolalka cajibka ah ee carruurtu si ay ugu horumaraan sannadahooda hore ee waxbarashada. Deeqda waxbarasho la'aanteeda, maanan awoodin inaan sii wato waxbarashadayda. Waaan ahay hooyo keligeed oo cusub oo ka faa'iidaytsata oo aad ugu mahadnaqaysa barnaamijyada sida Guuleystayaasha Hore. Deeqdan

waxbarasho ayaa ka dhig�ay hooyadan Latinada inay tusto caruurtooda in aysan waligeed daahin inaad gaarto yoolalkaaga iyo riyadaada. Waaan qorsheynayaa inaan sii wato barnaamijka bachelor-ka ee ECE ee LWTECH. Waad ku mahadsan tahay, Guuleystayaasha Hore, ka dhigidiina hooyadan inay yeelato rajo iyo bilow cusub oo nolosha ah.

Sheekada Prakash

Aniga iyo xaaskayga waxaan nahay Guuleystayaasha Hore oo ku diiwaangashan Heerka 2-aad daryeelka caruurnimada guriga afartii sano ee la soo dhaafay. Qof ka mid ah macalimiinta ee ku jira barnaamijkeena ma helin wax waxbarasho rasmi ah oo ECE ah. Tani, si kastaba ha ahaatee, waxay isbedeshay markii waaxda LWTech ECE ay nagu wargalisay fursadaha waxbarasho iyo sida ay suurtogal ugu noqon karto shaqaalaha xarunta Guuleystayaasha Hore inay ka qaybgalaan fasalada. Waaan had iyo jeer rabay inaan waxbarasho rasmi ah ka helo ECE sababtoo ah waxaan aaminsanahay in waxbarashadu ay kuu furto adduun fursado waxayna kuu diyaarinaysaa inaad si wanaagsan ugu adeegto bulshadaada. Waaan iska diiwaan galiyay koorsooyinka LWTech ECE kuwaas oo ay kafaalo qaadeen Early Achievers. Way adag tahay in la barto koleejka iyo shaqada, si kastaba ha ahaatee, taageerada Maalgelinta Early Achievers ee waxbarashadan ayaa gacan ka gysatay helitaanka waxbarashada rasmiga ah ee ECE-da ee suurtogalka ah. Waaan dhammeeyay Shahaadada Gaaban rubuci la soo dhaafay.

Aqoonta la helay ayaa iga caawisay inaan dib uga fikiro sida aan u daryeelo carruurta oo aan u horumarinta barnaamijkeena. Waaan ku arkay qimo aad u badan waxbarashadan dhexdeeda oo hadda aan rajaynayo dhammaystirka Shahaadada Gobolka iyo suurtogalmimada shahaadada la xiriirta.

Waaan rajeynayaa barnaamijka Early Achievers in had iyo jeer si wanaagsan loo maalgeleyo mustaqbalka iyo sida ay u suurtageliso macalimiinta inay qaabeeyaan carruurta ay la shaqeeyaan si ay u noqdaan muwaadiniin guuleysta berrito. -Salaan, Prakash M.



Sheekada Cynthia

Si aan usii wato wadada xirfada cusub ee korriinka ubadku waa isbeddel kale oo weyn iyo caqabad kale oo igu jirta ka dib markii aan u soo guuray Mareykanka aniga iyo qoyskayga afar sano ka hor. Sannadki hore, waxaan nasiib u yeeshay inaan ku biiro xannaano-maalmeedka saaxiibkay si aan ula shaqeeyo carruurta waxaan la yeelanay madadaalo badan. Waa kale oo ay iga dhig�ay in aan ogaado in aan noqdo bare xirfad leh ay aad muhiim ugu tahay korriinka carruurta. Waaan nasiib u yeeshay inaan ka qaybqaato fasalada ECE ee LWTECH oo aan la kulmay Brandi Renis, macalimiin kale, iyo saaxiibada kale ee ECE, wax badan ayaan ka bartay fasalada. In kasta oo rubucaygii ugu horreeyay uu ahaa saddex bilood oo keliya, liiska hubinta korriinka waxa uu iga caawiyaa in aan si dheeraad ah u fahmo astaanta carruurta ee kooxda da'da ah, waxaana fahmi karaa dabeecadaha carruurta fasalkayga oo aan heli karo dariiqooyinka saxda ah ee lagu caawinayo koritaankooda.

Waxaan isticmaalay hababka fasalka si aan u caawiyo carruurta inay markooda soo jeedsadaan oo muujiyaan sida loo xalliyo khilaafka keligood. Ku maareynta shucuurta ee neefta qotoda dheer iyo dareenka magaceed ayaa ka caawisay mid ka mid ah inanta ooynaysa in ay is dejiso, markay dhoola cadeynayso oo ay tiri "Waan jeclahay Macallin Yu" maalinta xigta, waad ogtahay xirfadlahaagu wuxuu caawiyaa koritaanka ilmaha waana ku faraxsanahay taas.



Waxaan u mahadcelinayaal LWTech iyo deeqda waxbarasho. Waxaan ka mahadcelinayaal inaan baran karo oo aan noqon karo xirfadle, gaar ahaan dhowrka sano ee ugu horreeya socdaalka ee waddan cusub. Sababtoo ah waxaan wajahaynaa dhibaatooyinka keenaya kuwa aan u dhalan Ingiriiska, isdhaafsiga weyn, iyo kala duwanaanta dhaqanka, raadinta shaqo la mid ah sidii hore ee magaalada cusub waxay keenaysaa caqabado. Fadlan sii wad inaad bixiso deeqaha waxbarasho ee iga caawin doona inaan dhammaystiro shahaadadayda oo aan xaqijiyo riyadayda. -Salaamo, Cynthia Y.

Nala Wadaag!

Ma heshay deeqda Early Achievers oo ma doonaysaa inaad la wadaagto sheekadaada? U dir sheekadaada Khabirka Waxbarashada ECE, [Sharene Leek](#), si lloogu soo bandhigo wargeyska xiga.



Ka-qaybgalka Bulshada ee DCYF

Kooxda ka qaybgalka bulshada ee DCYF waxay bixisa kormeer iyo taageero la shaqaynta daneeyayaasha dibadda iyo hay'adaha la-talinta si loo hubiyo in uu jiro xiriir joogto ah oo wax ku ool ah oo u dhixeyya xubnaha iyo wakaalada.

La Soco!

DCYF waxay haysaa fursado badan oo lagu hubinayo in codkaaga la maqlay. Qaar waxaa ka mid ah:

- [Golaha La-talinta Waxbarashada Hore](#)
- [Guddi-hoosaadka Taageerada Bixiyaha](#)
- [Kooxda La-talinta Waalidka](#)
- Iyo in ka badan!

Si aad u hesho liis dhamaystiran oo ah guddiyada la-talinta iyo golayaasha ama si aad uga qaybgasho, booqo [Bogga Shabakadda Ka-qaybgalka Bulshada ee DCYF](#).

Warbixiinada Qabaa'ilka

Ma ogtahay in DCYF ay leedahay Xafiis Xiriir Qabiileed?



- [Akhri Wargeyskooda Janaayo](#)
- [Akhri Wargeyskooda Disambar](#)
- [Akhri Wargeyskooda Noofambar](#)

DCYF waxay bixisaan mawduucyo isdiiwaangelineed oo kala duwan. [Fiiri liiska buuxa ee mawduucyada is-diiwaangelinta](#).

Calaamadee Bogga Websaydhka Dorumarinta Xirfadeed

Ha seegin warbixiinada ugu dambeysay ee la xiriirta tababarka iyo PD Calaamadee Bogga Websaydhka PD!

[Calaamadee Bogga PD](#)

Ku biir Wargeysyada PD

Kobcinta Shaqada waa kheyraad loogu talagalay dhammaan shakhsiyadka ku jira ganacsiga bixinta taageerooyinka waxbarashada xirfadeed ee shaqada waxbarashada hore.

Wargeyska PD waxaa loogu talagalay in lagu wargeliyo bulshada waxbarashada hore ee Washington dhammaan shaqada weyn ee la xiriirta Horumarinta Xirfadeed

[Ku biir](#)

Liis dhamaystiran oo wargeysyo ah ayaa laga heli karaa [Boggaga Wargeysyadeena iyo Webenarkeena](#).

Fariimo ka yimid Xoghayaha DCYF



Xoghayaha DCYF Ross Hunter wuxuu wadaagaa fariimaha billaha ah si uu u bixiyo warbixiinada iyo wararka ku saabsan shaqada wakaaladda. Hoos ka akhri farrimihiisii ugu dambeeyay iyo [halkan ku dhufo si aad isu diiwaangeliso](#).

- [Wargeyska Janaayo](#)
- [Wargeyska Disambar](#)
- [Wargeyska Noofambar](#)

Haddii aad qabto wax su'aalo ah ama faallooyin ah, fadlan la xiriir DCYF's [Xafiiska Isgaarsiinta](#).

Sideen Nahay?



Fadlan nala soo socodsii sida aan wax u wadno adiga oo si degdeg ah tani u qaadayna [saddex-su'aal ah](#).

Haddii aad hayso su'aalo ama mawduucyo talo-bixin ah la xiriir [Marlene White](#).